المكتب الصحفي
PRESS OFFICE
XAFIISKA WARFAAFINTA

بسم الله الرحمن الرحيم

للنشر العاجل

FOR IMMEDIATE RELEASE

حركة الشباب المجاهدين
HARAKAT AL-SHABAAB AL MUJAHIDEEN
XARAKADA MUJAAHIDIINTA AL-SHABAAB

# Beenin Hadal ka soo Baxay Saliibiyiinta Maraykanka

**06 Jamadul Thani 1447 H (27 November 2025)** – Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay beeninaysaa hadal ka soo yeeray saliibiyiinta Maraykanka kaas oo ay ku sheegeen in ay dadka Soomaaliyeed ee ku nool gobolka Minnesota ee waddanka Maraykanka ay maal-geliyaan Mujaahidiinta Al-Shabaab

Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay la socotaa in hadallada guracan ee ku dhisan nacaybka iyo cunsurinimada ee ka dhanka ah dadka Soomaaliyeed, kana soo yeeraya dowladda Maraykanka iyo madaxweynaheeda Donald Trump, kuwaas oo la doonayo in dadka Soomaaliyeed looga dhigto marmarsiiyo looga dhuunto fashilka siyaasadeed iyo dib u dhaca ku habsaday Maraykanka.

Maraykanku wuxuu leeyahay taariikh madoow oo ku astaysan gumaadka waxgaradka iyo haldoorka ummadda Soomaaliyeed, wuxuuna laga soo billaabo sagaashameeyadii ilaa maanta xasuuqay kumanaan shacab Soomaaliyeed ah oo iskugu jira dumar, caruur iyo waayeello, ayna ku jiraan waxgarad qiimo gaar ah u lahaa bulshada Soomaaliyeed. Waxaa ugu dambeeyay 12 qof oo 8 kamid ah ay caruur yihiin, 3 dumar ah iyo oday waayeel ah oo duqaymaha Maraykanku dhawr maalin kahor ku dileen magaalada Jamaame ee Jubada hoose. Weerarka ay la kulmayaan dadka Soomaaliyeed ee ku nool Maraykankana wuxuu qayb ka yahay nacaybkaas uu maamulka Washington u qabo guud ahaan Muslimiinta, gaar ahaan Muslimiinta Soomaaliya.

Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab kama gambanayso dagaalka ay ugu jirto sidii diinta, dadka iyo dalka looga difaaci lahaa damaca gurracan ee saliibiyiinta hororka ah ee uu Maraykanku hormuudka u yahay, balse ma aqbalayso in magaceeda loo adeegsado si loogu banaysto dhibaataynna shacabka Soomaaliyeed, ee ku nool dalka gudihiisa iyo dibadiisa.

Ugu dambeyn waxaan ummada Muslimka ah ee Soomaaliyeed, gaar ahaan culimada, aqoonyahannada iyo waxgaradka, ugu baaqeynaa inay u istaagaan oo ka dhiidhiyaan gardarrada qayaxan ee lagu doonayo in lagu dhibaateeyo dadka Soomaaliyeed, lagu boobo hantidooda, xuquuqdoodana loogu xad-gudbo.

Al-Kataib

وَلِلَّهِ الْعِزَّةُ وَلِرَسُولِهِ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَـٰكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ